

Magac qeybta I (Substantiv del I)

Ereyada uu af ka kooban yahay waxay u qaybsamaan qaybo kale duwan.

Qaybahaasi waxay ka qabtaan hawlo kale duwan marka la fiiriyo weedhaha ay ku jiraan. Magacu waa qayb ka mid ah qaybaha afku ka kooban yahay. Magacu waxa uu noqon karaa mid ay wadaagaan waxayaabo wadaaga dabecado ama astaamo isku mid ah sida aad marka la fiiriyo macnaha ku arki doonto tusaaleyaasha hoose.

Tusaale:

Qalin iyo buug ii soo iibi.

Caano , hibil iyo harag in laga helo ayaa loo dhaqdaa xoolaha.

Wiil iyo gabadh fariiddo ah ayaa dugsiga ila dhigta.

Erayada hoosta ka xarriqan ee ku jira tusalayaasha qor ku qoran waa magacyo , waxaana loogu yeedhi karaa magacyo guud.

Waxa kale oo magacu noqon karaa mid gooni u ah ama tilmaamaya qof ama shay, marka la fiiriyo macnaha erayada.

Tusaale:

Oslo waa magaalo madaxda Norway.

Cali waa wiil baarri Ah.

Cabdilaahi waa bare dugsiga ka shaqeeya.

Erayada hoosta ka xarriqan ee tusaaleyaasha ku jira waa magacyo tilmaamaya qof ama meel gooni.

Oslo, Norway waa magacyo lagaga sooci karo magaalooyinka iyo waddamada kale ee la nooca ah.

Sidoo kale Cali iyo Cabdillahi waa magacyo qofkii le laga soo karo dadka kale .

Magacyada guud waxa kale oo loo qaybin karaa kuwo la arki karo , ama la taaban karo iyo kuwo tilmaamaya waxyaabo aan la arki karin ma la taaban karin.

Kuwa la arki karo ama lataaban karo sida : geed, lax, buur, buug, qalin iwm Kuwa

aan la rkim karin ama lataaban karinna waxa ka mid ah, been, run, fikrad , dareen iwm.

Layli

1. U qaybi magacyagda soo socda magacyo guud iyo kuwo gaar ah.

Faras, irbad, qorrax, diddig, Berbera, Afrika, Ri', dumar, tufaax, Cabdi, ugaadh, Hamar, Masar, Saleebaan, awr, bad, webi, hooyo, ayeeyo.

2. U qaybi magacyadan kuwo la taaban karo ama la arki karo iyo kuwo aan la taaban karin ama la arki karin.

Xigmad, fariidnimo, been , baabuur, xiddig, aqoon,guri, digsi, ubax, farriin, garaad, cadho ama caro, gar, af, shimbir, qaanso,

3. Samee weedho adoo adeegsanaya magacyaga soo socda:

Xishood, naag, magaalo, wan, deero, Cumar, qaansoroobaad, iyo waalid.

Qore

Abdi O. Abdullahi